

## Kordhinta daahfurnaanta iyo hufnaanta doorashooyinka

Maarso 30, 2026

Sharci la soo jeediyay ayaa hoos u dhigi doona xadka lagu shaaciyay mushaharka, xoojin doona kormeerka hindiseyaasha muwaadiniinta iyo dib u celinta, isla markaana mamnuuci doona been-abuurka qoto dheer ee doorashooyinka (tiknoolajiyada been abuurka ah).

Haddii la ansixiyo, *Xeerka Wax ka beddelka Shuruucda Caddaaladda 2026* wuxuu hoos u dhigi doonaa xadka warbixinta mushaharka ee waaxda dadweynaha, wuxuu xoojin doonaa habraacyada dimuqraadiyadeed ee furan oo la heli karo, wuxuuna ilaalin doonaa hufnaanta doorashooyinka ee Alberta isagoo mamnuucaya abuurista iyo faafinta tiknoolajiyada been abuurka ah.

“Dadka reer Alberta waxay mudan yihiin daahfurnaan ka timaadda dowladdooda, taasoo sabab u ah in xoojinta warbixinta mushaharka ee waaxda dadweynaha ay weli tahay mudnaan. Isla markaana, waxaan sii wadeynaa hagaajinta sharciyada habraaca dimuqraadiyadda si aan u ilaalinno hufnaanta doorashooyinkeenna una hubinno in dadka reer Alberta ay si buuxda ugu kalsoonaadaan dimuqraadiyadeenna.”

*Mickey Amery, Wasiirka Caddaalada*

### **Xeerka Daahfurnaanta Mushaharka Waaxda Dadweynaha**

Xadka lagu shaaciyay mushaharka ee hoos yimaada xeerkan ayaa loo dhimi doonaa \$130,000 si loo xoojiyo isla xisaabtankada dadweynaha. Shuruudda ku saabsan shaacinta labaad ee lacagta kala tagga (severance) ee isla sannadka gudihiisa waa la tirtiri doonaa, si loogu soo noqdo hal shaacin oo sannadle ah, sida ay ku talisay Guddiga Joogtada ah ee Qoysaska iyo Bulshooyinka. Isbeddelladan lagu sameynayo Xeerka Daahfurnaanta Mushaharka Waaxda Dadweynaha waxay ilaalinayaan daahfurnaan xooggan iyagoo yareynaya caqabadaha maamulka (red tape).

### **Xeerka Hindisaha Muwaadiniinta**

Wax ka beddellada la soo jeediyay ee Xeerka Hindisaha Muwaadiniinta waxay kordhin doonaan daahfurnaanta iyo isla xisaabtankada iyagoo u oggolaanaya Wasiirka Caddaaladda iyo qofka soo jeediyay codsiga (petition) inay magacaabaan kormeerayaal (scrutineers) si ay ula socdaan habka xaqiijinta saxiixyada. Si loo hubiyo in waraaqaha saxiixyada la heli karo haddii ay jiraan walaacyo ku saabsan habka xaqiijinta, waraaqaha saxiixyada ee codsiyada hindisaha muwaadiniinta ee guuleysta waa in la hayaa laba sano, halkii ay ka ahaan jireen hal sano sida hadda lagu baahan yahay. Sidoo kale, waqtiyada kama dambaysta ah ee qabashada aftida ka dhalata hindise muwaadiniin oo

guuleysta waa la tirtiri doonaa. Tirtiridda waqtiyada go'an waxay suurtoagal ka dhigeysaa in aftiyada loo qorsheeyo si ku habboon.

## **Xeerka Dib u celinta**

Sida wax ka beddellada kale oo la mid ah, isbeddellada la soo jeediyay waxay u oggolaanayaan xildhibaan (MLA) lagu magacaabay codsiga dib u celinta iyo qofka codsiga gudbiyay inay magacaabaan kormeerayaal (scrutineers). Wax ka beddellada lagu sameynayo xeerkan waxay sidoo kale caddeynayaan in Madaxa Doorashooyinka (Chief Electoral Officer) uu waajib ku yahay inuu hayo waraaqaha saxiixyada ee codsiyada dib u celinta ee guuleysta ilaa codbixinta dib u celinta la dhammeeyo.

## **Xeerka Shaacinta Maaliyadda Doorashooyinka iyo Deeqaha**

Dowladda Alberta ayaa wax ka qabanaysa arrinta tiknoolajiyada been abuurka ah waxayna hubinaysaa in doorashooyinku noqdaan kuwo cadaalad ah oo daacad ah. Abuurista iyo faafinta tiknoolajiyada been abuurka ah oo ay u badan tahay inay marin-habaabiso codbixiyeyaasha ee ku saabsan dhaqanka ama hadallada musharrax ayaa la mamnuuci doonaa. Shakhsiyaadka waxaa lagu ganaaxi karaa ilaa ugu badnaan \$10,000, halka hay'adaha lagu ganaaxi karo \$100,000 haddii lagu helo inay jebiyeen xeerarka la xiriira tiknoolajiyada been abuurka ah.

Isbeddelladan marka la isku daro waxay hagaajinayaan habraacyada doorashooyinka, dib u celinta iyo hindisaha muwaadiniinta, waxayna xoojinayaan kalsooniida.

## **Xog kooban**

- Xeerka Wax-ka-beddelka Shuruucda Caddaaladda 2026 wuxuu wax ka beddelayaa sharciyadan soo socda:
  - Xeerka Daahfurnaanta Mushaharka Waaxda Dadweynaha
  - Xeerka Hindisaha Muwaadiniinta
  - Xeerka Dib-u-celinta
  - Xeerka Shaacinta Maaliyadda Doorashooyinka iyo Tabarucaadyada
- Xeerka Daahfurnaanta Mushaharka Waaxda Dadweynaha wuxuu waajib ka dhigayaa in la shaaciyo mushaharka iyo lacagaha kala-tagga (severance) ee shaqaalaha ka sarreeya xad go'an, iyo dhammaan xubnaha guddiyada hay'adaha dadweynaha, sannad kasta 30-ka Juun.
- Xadka mushaharka ayaa laga dhimi doonaa \$133,813 ilaa \$130,000 shaqaalaha Dowladda Alberta, iyo \$159,676 ilaa \$130,000 ee hay'adaha kale ee waaxda dadweynaha.
- Deepfakes waa warbaahin u muuqata mid dhab ah oo soo bandhigaysa qof jirta, balse si dijitaal ah loo sameeyay ama loo beddelay.

- Deepfakes waa la mamnuuci doonaa haddii ay u badan tahay inay marin-habaabiso codbixiyeyaasha oo ku saabsan dhaqanka ama hadallada:
  - hoggaamiyaha xisbi
  - qof u tartamaya hoggaanka ama magacaabista
  - musharrax
  - Wasiir
  - xildhibaan
  - Madaxa Doorashooyinka (Chief Electoral Officer)
  - Guddiga Doorashooyinka (Election Commissioner)
  - shaqaalaha Elections Alberta
  - saraakiisha doorashooyinka

## Macluumaad la xiriira

- Hagaajinta habraacyada dimuqraadiyadda iyo ilaalinteeda ([Improving democratic processes and protections](#))
- Warqad xogeed: Xeer Lambar 23: Xeerka Wax ka beddelka Shuruucda Caddaaladda 2026 ([Fact sheet: Bill 23: Justice Statutes Amendment Act, 2026](#))

## Warar la xiriira

- Soo celinta kalsoonida habraacyada dimuqraadiyadda ([Restoring confidence in democratic processes](#)) (Des. 4, 2025)
- Xoojinta dimuqraadiyadda ([Strengthening democracy](#)) (Aabriil 29, 2025)